Caddad Gaar ah oo ku Saabsan Rabshadaha ka dhanka ah Carruurta



# Carruurteenna **"our children"**

Warsidaha UNICEF Soomaaliya | Jannaayo 2009

## Waa waqtigii la joojin lahaa rabshadaha ka dhanka ah carruurta Soomaaliyeed

***Waxa qorey Christian Balslev-Olesen***
***Wakiilka, UNICEF Somalia***

Dhammaan rabshadaha ka dhacay Soomaaliya waxa ay saameyn ku yeesheen carruurta. Rabshadahani si toos ah ama si toos ahayn ha u soo gaareen carruurta, waxa ay si weyn ula silcayaan saameyntooda.

Marar bdaan, carruurta Soomaaliyeed si toos ah ayaa ay u soo gaartaa rabshaddu. Waxaa laga qortaa askar. Waxaa iyaga oo dugsigooda ku socda naafeeya miinooyinka dhulka ama bambooyinka la dhigo waddada dhinaceeda. Waxa ay ku dhintaan xabadaha ay is-dhaafsanayaan kooxaha dagaallamaya. Saxaaxooda ayaa la jarjaraa (gudniinka), dugsiyada ayaa lagu qaraacaa, waa la iska xiraa, la xabissaa, la kufsadaa oo dhagaxna lagu dilaa.

Marar kale, carruurtu toos uma taabato rabshadda, laakiin waxa ay ku koraan dal ay rabshaduhu baabi'iyeen kheyraadkii loogu baahnaa in lagu gaaro helidda xuquuqda ay leeyihiin.

Sanado ay dagaallo ka jireen Soomaaliya ayaa carruurtg ku waayeen waalidiin, macallimiin, kaalkaaliyeyaal iyo dhakhaatiir. Rabshadda ayaa daciifisey nolol-raadisigii, oo uga sii dartey wax la'aanta la xiriirta saboolnimada ba'an. Iyaga oo



***Ilmo kasta oo Soomaaliyeed waxa uu xaq u leeyahay in laga badbaadiyo iskahorimaadyada hubeysan. © UNICEF Somalia/2007/Kamber***

lagu khasbey in ay ka cararaan rabshadda iyo nidaam-darrada, carruurta ayaa ah kuwa ugu horreeya ee la silca nafaqo-xumo, cudur, dhibaatooyin nafsaani ah iyo waxbarasho la'aan.

Rabshadda Soomaaliya – noocyadeeda kala duwan – waxa ay dhibaatooyinkan soo socda ku keeneysaa horumarkii uu dalka ku gaari lahaa Yoolalka Horumarka Kun-sanadka:

Iskahorimaadka iyo rabshaddu waxa ay dhammeeyaan kheyraadka muuqda, kan dhaqaale iyo kan dadka waxaana ay halis geliyaan badbaadada carruurta. Cunsuradani waxa ay halis-geliyaan horumarka loo qaadayo dhinaca yoolalka **lagu baabi'inayo saboolnimada ba'an iyo gaajada** iyo kuwo lagu **yareynayo dhimashada carruurta.** Mid ka mid ah lixdii carruur ah ee da'doodu ka yar tahay shan jir oo Soomaaliya ku nool ayaa la silcaya nafaqo-xuma ba'an, waxaana dhimmanaya mid ka mid ah toddobadii carruur ahba inta aanu gaari shan jir. Rabshadda, iskahorimaadka iyo barokaca ayaa ka qaybqaadanaya ixsaa'iyaadkan naxdinta leh.

Iyada oo ay ka mid yihiin cunsuro kala duwan oo lala xiriiriyo horumar yarida, gaaridda yoolka **in la wada helo waxbarashada aasaasiga ah** waxaa daciifiyey jiritaanka iskahorimaadyada hubeysan iyo ixtiraam la'aanta shuruucda caalamiga ah ee bani'aadamnimada. 144 dugsi ayaa lagu xirey shan degmo oo Muqdisho ku yaalla maaddaama ay soo weerareen ama halis ay u galeen weerar markii ciidamo ay degeen degaannadii ku hareereysnaa.

34 dugis oo Muqdisho ku yaalla ayaa ay qabsadeen kooxo hubeysan. Taana waxaa ay keentey in 50,000 oo carruur ah lagu khasbey in ay dayacaan waxbarashadoodii. Yoolalkii **dhiirigelinta sinnaanta jinsiga iyo awood-siinta haweenta** iyo **wanaajinta caafimaadka hooyada** ayaa ay culeys ku noqdeen guur waqtigiisii ka soo hormarey, jarjaridda/goynta saxaaxa haweenka (gudniinka) iyo rabshadaha la xiriira jinsiga.

***Eeg bogga 2aad***

### Ilmo askar hore looga dhigtey oo ka sheekeynaya wixii uu soo marey

Cumar waxa ay hooyadii dayacdey isaga oo laba sano jir ah dalkana waa ayka dhooftey, aabbihii oo ahaa darawal baabuurta waaweyn wada waxa uu dhintey sanadkii 2000. Eeddadii ayaa uu kula noolaa caasimadda Muqdisho, in kasta oo iyada laftigeeduba ay masaakiin ahayd oo aaney awoodin in ay dugsi geyso. Waxa uu lacag yar ka heli jirey caseeyenimo uu kaga shaqeysan jirey waddooyinka magaalada dagaalladu ay halakeeyeen ee Muqdisho. Waqtigaas, waxa uu cuni jirey qaadka waxaana uu dhuuqi jirey koollada si uu isugu ilowsiiyo rajo-xumada, kelinimada iyo cabsida haysey. Isaga oo ah naf-la-caari gaajeysan oo qaadka iyo koolladana bartey, ayaa waxa uu 2006dii ku biirey maleeshiyadii qabiilka. "Maxaa kale oo aan sameyn karey?" ayuu is weydiiyey.

Waxa uu bartey sida loo adeegsado hubka fudud waxaana la geeyey jiidda hore si uu uga qaybqaato iskahorimaadyada hubeysan. Afar bilood ka dib, waxa uu ka tegey Muqdisho waxaana uu aadey Shabbeelaha Hoose halkaas oo uu ku biirey booliiska. Nasiib wanaag, Cumar waxaa arkey hay'ad ay taageerto UNICEF oo ilaalisa carruurta, qof arrimaha bulshada ka shaqeeya ayaana ka caawiyey sidii uu qoriga isaga dhigi lahaa. Haseyeeshee, waxaa culays ku noqdey sidii uu u iloobi lahaa wixii soo marey. "Dad badan ayaan ku diley Muqdisho, waxyaabo badanna waa aan ku burburiyey" ayuu yiri.

***Eeg Bogga 4aad***

### CADDADKAN KA AKHRISO


| | |
|---|---|
| Faallada Wakiilka | 1/2 |
| Ilmo hore askar looga dhigtey oo ka sheekeynaya wixii soo marey | 1/4 |
| Awood-siinta Bulshada | 2/3/4 |
| Hogaamiyayaal wax ka qabtey rabshad | 3 |
| Haweeney booliis ah oo hadashey | 4 |
| U qareemeynta iyo beddelka ciqaabta jirka | 5 |
| Ka hadlidda gudniinka | 6 |


**Mid ka mid ah toddobadii carruur ee Soomaali ahba mid ayaa dhinta ka hor inta uusan gaaran shan jir...**

UNICEF ©Carruurteenna

## Beelaha oo la xoojiyo si ay u sameeyaan isbeddel bulsho

*Waxaa jira siyaabo badan oo loo adeegsado taageeridda horumarka iyo isbeddel bulsho oo habboon oo ay sameeyaan beelaha Afrikaanka ah. Molly Melching ayaa sameysey habab cusub oo u awood-siiya beelaha sidii ay u go'aansan lahaayeen sida ay rabaan in ay u sameeyaan iyo in ay siiso qalabkii loogu baahnaa maareynta is-beddelka. Gabadhaas oo ah aasaasaha iyo agaasimaha Tostan, oo ah NGO horumarin oo ay bulshadu hoggaamiso oo xaruntiisu ay tahay Dakar, Senegal, oo ka shaqeeya dalalka Afrika, oo ay ku jirto Soomaaliya halkaas oo uu kala hawlgalo Unicef. Wareysigii lala yeesheyna waa kan hoose.*



***Molly (bartanka, safka dambe) oo la joogta saaxiibadeed ay ka wada shaqeeyaan hawsha Tostan ee Soomaaliya. © 12-08/Tostan***

**Sidee ayaa uu isbeddelku "uga dhacaa" beelaha Afrika dhexdooda?**
Marka hore aan kuu sheego sida ay ila tahay in aanu isbeddel u imaanin. Kuma yimaado marka ay dad bannaanka ka yimid ay ku dirqinayaan beelaha sida ay tahay in uu mustaqbalkoodu ahaado. Kuma yimaado dhaliil lagu sameeyo beelaha iyo in dusha lagaga keeno waxyaabo aaney iyagu aaminsaneyn.

**Haddaba sidee loo dhiirigelin karaa isbeddel habboon?**34tii sano ee aan ku noolaa Afrika, si joogto ah ayaan isu weydiin jirey su'aashan. Waxa aan ku qanacsanahay in waxa loo baahan yahay ay tahay aqoon. Waxa aan si joogto ah u ogaadey in beelaha miyiga ku nool ay u baahi qabaan xog iyo aqoon ku qoran luqadahooda. Tostan waxa ay xoogga saartey aqoonta ku jirta Barnaamikeeda Awood-siinta Beelaha, oo ah barnaamij 30-bilood socda oo ka kooban in ka badan 200 oo cashar oo ku saabsan dimuqraadiyadda, xuquuqda bani'aadamka, xallinta dhibaatooyinka, nadaafadda, caafimaadka, akhis-qoraalka, iyo xirfadaha maareynta.

**Siddee ayaa ay tan uga duwan tahay hababka kale ee horumarinta beelaha?**
Barnaamijka Awood-siinta Beelaha waxa uu dadka ka caawinayaa sidii ay u go'aansan lahaayeen waxa ay u rabaan mustaqbalkooda. Tostan uma meerineyso beelaha yoolalka ay tahay in ay higsadaan. Waxa aad adeegsanayaa habab xoogga saaraya waxyaabaha ay qiimeeyaan dhaqamada Afrika, oo ay ku jiraan masraxa, sheeko-sheegidda, ciyaarta, farshaxanka, heesaha, doodaha, iyo wadaagidda waayoaragnimada shakhsiga ah. Arrintani waxa ay beesha dhigeysaa bartamaha geeddi-socodka isbeddelka. Ma ahan ka-faa'iideystayaal. Waxa ay noqonayaan wakiillada la xoojiyey oo isbeddelka dhaliya.

**Isbeddel-bulsho oo noocee ah ayaa uu barnaamijkani keenayaa?**
Waxa aan dhowaan dalka Senegal kala kulaney tusaale cajiib ah. Intii ay tuula-joogga sii dhex-galayeen barnaamijka, waxa ay ogaadeen xuquuqda bani'aadamanimada. Markii ay ogaadeen xuquuqdooda bani'aadamnimada, waxa ay xaqiiqsadeen iyada oo laga yaabo in ay tahay markii ugu horreysey in ay lahaayeen doorashooyin kala duwan. Kumana sii khasbaneyn in ay arrimaha u qaataan sida ay ahaayeen. Marka naag uu qaraaco ninkeeda, ka qaybgalayaashu waxa ay go'aansadeen in ay wax ka qabtaan arrinta rabshadda ee ka dhex jirta beeshooda.
Si wadajir ah ayaa ay u diideen rabshadda iyaga oo si nabadgelyo ah socod ugu mareya tuuladooda, qaadaya heeso nabadda iyo wadahadalka ka hadlaya oo ogeysiiskan la wadaagaya deriskooda. Waa hawraar aad u awood badan! Dhacdadaas ka dib, fahamkii dadka ayaa is beddeley. Kani waa isbeddel bulsho oo habboon.

**Tostan hadda waxa ay ka shaqeyneysaa Soomaaliya. Habkaan ma ka shaqeyn karaa dhinaca kale ee qaaaradda iyada oo laga soo qaadanayo Senegaal oo ah halkii lagu sameeyey?**Waxa aan aaminsanahay in qaabkan lagu saleyn karo dhammaan dhaqamada. Barnaamijku waxa uu adeegsanayaa qaab-dhismeedka xuquuqda bani'aadamka si uu ugu oggolaado ka qaybgalayaasha in ay wax ka qabtaan arrimahooda. Waxa aan sidoo kale bixinnaa xogtii loo baahnaa ee dhinacyada nadaafadda, caafimaadka iyo xirfadaha maareynta oo ku qoran luqadaha dalka.

**Sidee Tostan ay shaqada uga bilowdey Soomaaliya?**Waxa aan ka qaybgalayey seminaar ku saabsan gudniinka sanadkii 2004ta. UNICEF ayaa igu marti qaaddey in aan imaado Soomaaliya oo aan ka qabto aqoon-is-weydaarsi si aan ugu sharxo qaabka aan u waajahno horumarka. Jawaab aad u wanaagsan ayaan ka helney Soomaaliya, waxaa aan sanadkii 2005ta ku bilowney Barnaamijka Awood-siinta Beelaha oo aan ka fuliney 42 beelood oo Soomaaliya ah annaga oo hawsha la wadna UNICEF.

**Muxuu yahay Jarjaridda/goynta Saxaaxa Gabdhaha (Gudniinka Gabdhaha)**Waxa aan isticmaallaa ereyga Goynta Saxaaxa Gabdhaha si aan ugu tilmaamo gudniinka, kaas oo ah in qayb ahaan ama gebi ahaan la jaro saxaaxa kore ee gabadha. Waxaa ku dhaqma beelaha ku nool ama ka soo jeeda Afrika, Aasiya iyo Bariga Dhexe.

*Eeg bogga 3aad*

## Jooji rabshadaha ka dhanka ah carruurta

*ka yimid bogga 1*

98% gabdhaha Soomaaliyeed waxa lagu sameeyey jarjaridda/goynta saxaaxa gabdhaha, kaas oo ay kala kulmaan dhibaatooyin caafimaad inta ay nool yihiin.

Marka ay xaaladahu caadiga yihiin, hannaanka daryeelka caafimaadka iyo kan waxbarashada ayaa si wada jir ah uga shaqeeya sidii carruurtu ugu negaan lahayeen caafimaad qab iyada oo la siinayo xogta la xiriirta caafimaadka iyo weliba daryeel daaweyn oo ay helaan. Haseyeeshee, sanado ay Soomaaliya ku jirtey iskahorimaadyo ayaa ay ku burbureen kaabayaashii caafimaadka iyo kuwii waxbarashada, taas oo culeys weyn ku noqotey gaaritaanka yoolkii **la dagaallanka HIV/AIDS, duumada iyo cudurada kale.** Ujeeddadii ahayd **hubinta in degaanku waaro** ayaa ay handadaad kaga timid iskahorimaadyadii hubeysnaa ee Soomaaliya ka socdey dhowr iyo tobanka sano, taas oo hor istaagtey tallaabo kasta oo rasmi ahaan looga qaadi lahaa dhibaatooyinka degaanka. Kuwaas waxaa ka mid ah abaaraha dabadheeraada, baabi'inta geedaha ee ay keento dhuxul-jarista, daaqsinta badan ee xoolaha reerguuraaga, nabaad-guurka iyo lama-degaamoobidda iyo kalluumeysiga xaaraanta ah ee ay maraakiibta shisheeye ee isticmaala shabaakta aan waxba reebin. Ereyadii lagu furey cilmi-baaristii 2006dii Qaramada Midoobey ku sameysey rabshadaha ka dhanka ah carruurta ayaa ina xusuusinaya in "rabshad aan marna loo qiil sameyn karin lagula kaco carruurta".

Caddadkan warsidaha *Carruurteena* la magac baxay waxa uu bidhaaminayaa rabshadda aan loo qiil sameyn karin ee soo wajahday carruurta Soomaaliyeed. Waxaa kale oo uu dhinac ka tusayaa horumarka ay sameeyeen UNICEF, madaxda Soomaaliyeed, deeqbixiyeyaasha caalamiga ah, la-hawlgalayaasha aan dowliga ahayn iyo ururada bulshada Soomaaliyeed si ay wax uga qabtaan rabshadaha ka dhanka ah carruurta in kasta oo ay haddana jiraan culaysyo badan. Cilmi-baarista Qaramada Midoobey ayaa ku sii dartey in "bulsho kasta, si kasta oo uu yihiin dhaqankeedu, dhaqaalaheeda ama taariikhdeeda bulsho, waa ay awooddaaye waa in ay joojisaa rabshadaha ka dhanka ah carruurta." Caddadkan warsidaha *Carruurteena* waxa uu higsanayaa in uu baahiyo dhawaaqan si ay u maqlaan – ugana soo jawaabaan – muwaaddiniinta Soomaaliyeed iyo kuwa caalamka.

**Beelaha oo la awoodsiinayo si ay u arkaan faa'iidada ay leedahay joojinta jarjaridda/goynta saxaaxa gabdhaha...**

## Hoggaamiye-dhaqameedyo wax ka qabtey rabshadaha dhalinyarada ee Hargeysa

Axmed waa 17 jir. Aabbihii waa uu dhintey waxaana isaga iyo saddex walaalihiisa ahba gacanta ku haysa hooyadood oo suuqa caano ku iibisa. Axmed waxa uu taariikh u leeyahay in muddo markii la joogaba ay sharciga isku dhacaan. Hoggaamiye dhaqameed, magaceedu yahay Muna oo xubin ka ah guddiga ilaalinta carruurta, ayaa ay la tahay in "dhibaatadani ay keentey jirid la'aanta kormeerkii waalidiinta. Carruurta iyo dhallinyaradu waxa ay u baahan yihiin hoggaamin."

Axmed waxa uu ka tirsan yahay koox isboortiga dheesha oo magaceedu yahay "*Rangers*". Waxa ay inta badan la tartamaan koox kale oo la yiraahdo "Dabka". Dhibaatada ayaa bilaabatey markii maalin ay koox kasta damacdey in ay iyadu ku dheesha garoonka ku yaalla Xerada Dadka Gudaha ku Barakacay ee Sheekh Nuur ee magaalada Hargeysa, Soomaaliland. Murankii ayaa dhaliyey dagaal waxaana la dhaawacay wiil dhalinyaro ah oo kooxda *Rangers* ka tirsan. Dhalinyaradii waxaa kala dhex galay hoggaamiyeyaasha beesha iyo booliska. Markaa ayaa ay kooxihii bilaabeen in ay sameystaan kooxo gaangistarro ah. Maalin labaaddii si ay uga aarguttaan dhaawacii loo geystey saaxiibkooda, kooxdii *Rangers* waxa ay weerareen kooxda Dabka. Cali oo ahaa 16 jir xubin ka ah kooxda Dabka ayaa toorey lagu weerarey. Si xun ayaana looga dhaawacay garbaha iyo madaxa. Cusbitaalka ayaa la seexiyey waxaana uu u baahdey in dhiig lagu shubo. Booliiska ayaa xirey lix dhallinyaro ah laakiin laba dhalinyarada ka mid ahaa ayaa baxsaday.

Markaan waxaa arrinta soo farageliyey hoggamiyeyaasha dhaqanka. Markii ay baareen xaaladda, waxa ay madaxa saldhigga booliiska ee Sheekh Nuur kula heshiiyeen in ay arrrinta ku xalliyaan xeer-dhaqan. Waxa ay qiimeeyeen dhaawacii soo gaarey wiilka waxaana ay u xukumeen barigooyo oo ah dhaqaale hore loo bixiyo oo loogu talogalay in ay daboosho kharashka daawada ee qofka la dhaawacay. Kuwii dhibka geystey waxa ay saldhigga ku xirnaayeen saddex toddobaad, intii uu wiilka dhaawacmey ka soo kabanayey dhaawacii gaarey. Intaa ka dib, odeyaashii waxa ay dhexgaleen dhexdhexaadintii lagu xalinayey muranka, iyaga oo adeegsanayey xeerkii qabiillada u yaalley. Geeddisocodkaas waxaa kuwii dhibka geystey uu ku keeney in ay ka xumaadadaan anshax-xumadii ayna oggolaadaan mas'uuliyadda dhibataadii ay geysteen. Geeddi-socodka dhexdhexaadinta, waxa uu Axmed ku dhaliyey in uu ka xumaado dhibaatadii uu geystey, gaar ahaan tii uu ku keeney qoyskiisa. "Ma rabo in aan dhibaato kale u keeno hooyadey" ayuu yiri isaga oo aad ugu xun arrinta. "Aad ayaa ay u shaqeysaa si ay noo korcso aniga iyo walaalahay. Waxa aan rabaa in aan qaato taladeeda oo aan ku noqdo dugsiga."

Hoggaamiyeyaasha dhaqankuna waxa ay intaa sii wadaan hawshii ay ku dhexdhexaadinayeen ayna ku xalinayeen iskahorimaadyada iyaga oo adeegsanaya hababkii soo jireenka ahaa. Mid ka mid ah ayaa ka hadley hawshooda ay wakiilka kaga yihiin carruurta jebisa sharciga. "Dhalinyaro beesheena ah ayaa dhibaatooyin ay geysteen daraaddood u galey xabsiga Mandheera iyo xabsiyo kale. Tani waa ay uga sii dareysaa dhalinyarada waxaana ay ka dhigeysaa kuwo intii hore ka xun marka ay xabsiga ka soo baxaan ee ay soo guryo noqdaan. Waxa aan isku daynaa in aan dhexdhexaadin ka galno arrimaha si aan xabsiga loogu dirin iyo si aan u ilaalinno nabadgelyada", ayuu yiri Caaqil Cali Jaamac.

*Iyada oo ay iskaaashanayaan Barnaamijka Qaramada Midoobey ee Horumarinta iyo Wasaaradda Caddaaladda ee Soomaaliland, UNICEF waxa ay taageertaa habraacyada caddaaladda rasmiga ah iyo kuwa dhaqanka ee u habboon carruurta.*

## Awood-siinta beelaha ee si loogu diyaariyo isbeddelka bulshada

*Ka yimid bogga 2aad*

100 ilaa 140 milyan oo gabdho ah ayaa falkaan lagu sameeyey dunida oo dhan. Dalka Soomaaliya, ku dhowaad 98% gabdhaha ayaa gudniinka lagu sameeyaa.

**Ixsaa'iyaadkani waa kuwo laga xumaado. Maxay tahay saameynta gudniinku ku keeno gabdhahan?** Gabdhaha iyo haweenka la gudey waxaa la soo gudboonaan karta inta ay nool yihiin halis caafimaad, oo ay ka mid yihiin xannuun, dhiig-bax, caabuq iyo dhibaatooyin nafsaani ah. Gudniinku waxa uu sidoo kale badiyaa halis soo wajahda hooyada marka ay dhaleyso. Waxaana inta badan lagu sameeyaa qalab aan nadiif ahayn iyo meelo ka fog xarumaha caafimaadka.

**Muxuu gudniinka uga sii jiraa Soomaaliya iyo dalal kale haddii uu sidaa u dhibaato badan yahay?**
Waxaa jira culays bulsho oo qoysaska Soomaaliyeed lagu saarayo in ay sii wadaan gudniinka. Taariikh dheer ayuu ku leeyahay dhaqanka iyo hidaha Soomaaliyeed. Dad badan ayaa ka baqa in ay ceebeeyaan ayna takooraan beelahooda haddii ay go'aansadaan in ay ka tagaan gudniinka. Waxaa la aaminsan yahay haddii aan gabadha la gudin, in aan la guursan doonin. Hooyooyin iyo ayeeyooyin badan oo Soomaaliyeed ayaa dareemaya in aaney jirin wax kale oo ay sameeyaan oo aan ahayn in ay gudaan gabdhahooda iyo kuwa ay ayeyda u yihiin.

**Maxay tahay habka ay Tostan's u waajahayso gudniinka?** Waxa aan adeegsanaa hab sharafta qofka dhowraya oo u oggolaanaya in tuula-jooggu ay go'aankooda ka gaaraan gudniinka ayna hoggaamiyaan dhaqdhaqaaqa ay iyagu leeyihiin ee ay wax ku beddelayaan. Waxa aan tuula-joogga ku xoojinnaa aqoonta xuquuqda bani'aadamka iyo xog wanaagsan ka dibna waxa ay go'aansadaan mustaqbalka ugu wanaagsan beelahooda. Barnaamijka Tostan waxa uu tuula-joogga ka dhigaa kuwo hoggaamiya go'aamada laga gaarayo gudniinka. Isbeddelku waa in uu gudaha ka yimaadaa.

**Barnaamijka Awood-siinta Beelaha ma keeney in ay beeluhu iska daayaan gudniinka?** Dalalka Senegal iyo Guinea, waxa uu keeney in dadku ay si weyn isaga daayaan gudniinka. Marka ay xubnaha beeshu bartaan xuquuqdooda bani'aadamnimada, waxa ay si dabiici ah u bilaabayaan in ay su'aalo ka keenaan gudniinka, waxaana loo baahan yahay in uu ahaado go'aan wadajir loo gaari. Hal qof keligii iskama deyn karo gudniinka isaga oo aan halis u gelin in la takooro ama uu ku guur waayo. Waxa aan caadi ahaan aragno waa in hal tuulo ay wada go'aansataa in ay iska dayso gudniinka. Tuuladaa ayaa markaa gaareysa tuulooyinka deriska la ah ee ay deggan yihiin qaraabadooda si ay ula wadaagaan casharadii ay barteen.

**Sidee ayaa ay tuulooyinka deriska ah ay markaa uga falceliyaan? Ma diidaan in ay wax ka beddelaan dhaqanka iyaga ku weyn?**
In aad weerarto hiddaha dadka waxba ma tareyso. Waa ixtiraam-darro, guud ahaanna, waa mid aan taabagal ahayn. Haddii ay tuula-jooggu jecel yihiin in ay arrintaan kala hadlaan qaraabadooda, waxa sida ugu wanaagsan looga hadlaa qaab la xiriira caafimaadka iyo wanaagga ee ma ahan in la weeraro hiddaha. Haddii sidan loo waajaho gudniinka, ama dhaqan kasta oo dhibaato leh, waxaa ka dhalan kara natiijooyin aad u wanaagsan.

**Molly, sidee ayaad ku bilodey hawsha horumarinta beesha?** Waxa aan Senegal imid 34 sano ka hor si aan wax ugu barto Jaamacadda Dakar. Waxa aan jeclaa in aan la shaqeeyo carruurta. Waxa aan arkey in aaney adeegsaneynin hidahooda ama afkooda. Waxbarashadu waxa ay ahayd mid caajis ah waxaana ay u ekeyd in ay kala saareyso iyaga iyo noloshooda. Waxa aan furey xarun carruurta wax lagu baro, aniga oo adeegsanaya sheekooyinka carruurta. Habkaan waxbarashada ayaa guuleystey waxaana aan markaa arrintii u geeyey beelaha miyiga ku nool. Waayo-aragnimada aan ka bartey beelaha miyiga ayaa iga caawisey in aan abuuro habkan waxbaridda ee ay adeegsaneyso Tostan.

*Eeg bogga 4aad*

## Sarkaalad Booliis ah oo ka sheekeyneysa kaalinta ay ka ciyaarto ilaalinta carruurta iyo haweenka Hargeysa

*Amal (sawirka midig) waa gabar 29 jir ah oo ka shaqeysa qaybta haweenka iyo carruurta ee Saldhigga Dhexe ee Booliska ee Hargeysa. Waxa ay UNICEF uga sheekeysey shaqadeeda*

**Goorma ayaad ku soo biirtey ciidanka booliska maxaadse u doratey in aad ka shaqeyso qabyta haweenka iyo carruurta ee Saldhiga Dhexe ee Booliiska Hargeysa?**
Waxa aan ciidanka booliska ku biirey sanadkii 2000. waxaan aan u doortey in aan ka shaqeeyo qaybta haweenka iyo carruurta anniga oo la kulmey carruur iyo haween badan oo dhibaato ka soo gaartey rabshadda iyo xadgudubka. Waxaa aan rabey in aan u gargaaro.

**Ma soo qaadatey tababar gaar ku ah caddaaladda carruurta?**
Haa. UNICEF ayaa tababar igu siisey akadeemiyadda booliiska ee Mandhera sanadkii 2006. Waxa aan baraney xuquuqda carruurta iyo muhiimadda ay leedahay in la dhegeyso ra'yiga carruurta.

**Ma ku soo maraan xaalado badan oo la xiriira rabshado ka dhan ah haweenka iyo carruurta.**
Nasiib-darro, haa waa ay i soo maraan.

**Maxay yihiin noocyada xaaladaha ee ugu badan?**
Kufsiga ayaa ah dembiga ugu badan ee aan aragno in lagula kaco haweenka iyo carruurta Soomaaliland.

**Sidee ayaad gacan u siisaa haweenka iyo carruurta la kursado?**
Waxa aan ka qoraa warbixin faahfaahsan, taas oo lagu adeegsado maxkamadda. Waxaa kale oo aan isku dayaa in aan caawiyo haweenkan iyo carruurta waxa aan isku dayaa in aan ka caawiyo in aaney rajo dhigin. Dhaqankeena, ceeb badan ayaa lala xiriiriyaa arrintan. Haween iyo carruur badan ayaa ka baqa in dayriyaan beelahooda. Sidoo kale waxa aan u diraa adeeg caafimaad iyo mid nafsaani, oo uu ku jiro baaritaanka HIV-ga.

**Kufsigu muxuu aad ugu badan yahay?**
Qaar badan oo xaaladahan ka mid ahi waxa ay la xiriiraan isticmaalka maandooriyaha. Badi kuwa dhibta geysta waxa ay soo isticmaaleen qaad, aalkolo ama xashiish markii uu shilku dhacayey. Shaqo la'aanta badan iyo barkaca ka dhashey iskahorimaadyada Soomaaliya ayaa iyana kaalin ku leh.

**Maxay yihiin arrimaha kale ee aad wax ka qabato?**
Waxaa Hargeysa jirta dhibaato sii badaneysa oo la xiriirta carruurta derbi-jiifka ah. Carruurta waddooyinka ku nool waxa ay noqon karaan kuwo dhibaato ay soo gaarto ama geysta dembiyo. Qaar ka mid ah carruurta derbi-jiifka ah waxa ay cunaan qaadka, waxa ay cabbaan aalkolada waxaana ay dhuuqaan koollada. Marka uu maandooriyuhu jirkooda ku jiro waxa ay bilaabi karaan rabshad waxaana si fudud u ugaarsan kara dembiilayaasha. Waxaana jiira baabuurta marka ay xaaladdan ku jiraan. Waxaa jira xaalado la xiriira carruur ay habeenkii kufsadeen rag waaweyn.

**Maxay carruurta derbiyada u jiifaan?**
Qaarkood sababta ay dembiyada u jiifaan waa agoonnimo ama waalidkood ayaa kala tagey mana lahan cid daryeesha. Qaar kale waxa ay sheegaan xadgudub gurigooda ka dhaca, ama waxa ay sheegaan in ay jecel yihiin in ay "xornimo" ugu noolaadaan waddooyinka. Marka laga soo tago sababaha ay sheegaan in ay derbi-jiif Hargeysa ugu noqdeen, dhammaan carruurtani waa kuwo nugul, gaar ahaan u nugul isticmaalka maandooriyaha iyo dhiigmiirashada iyo xad-gudubka jinsiga ah.



***Amal oo ka shaqeynaysa miiskeeda magaalada Hargeysa.© UNICEF Somalia/2008***

**Ma jiraan gabdho badan oo booliis ah?**
Maya. Keliya lix ayaan ku joognaa xafiiskan.

**Sabab?**
Waxaa jirta in ay dadku si khalad u aaminsan yihiin in boolinimadu ay tahay howl rageed. Tani waxa ay keentey in haween tiro yari ay fursad u helaan in ay galaan ciidanka booliska. Tani tartiib tartiib ayaa ay isu beddeleysaa, marka ay xubnaha kale ee booliiska iyo bulshaduba ay arkaan sida ay haweenka booliiska ahi uga soo baxayaan shaqadooda.

**Waxa aan hubaa in ay gabdho badan oo ku tallamaya in ay ciidanka booliiska ku soo biiraan ay ku soo higsanayaan.**
Waxaan rajeynayaa in uu arrinku sidaa yahay.

## Ilmo hore askar looga dhigtey oo warramaya

*ka yimid bogga 1aad*

"Waa la i ugaarsanayaa waana la ina dilayaa haddii aanan haysan qori aan isku ilaaliyo". Cumar ayaa markii ugu horeysey dugsiga tegey oo lana noolaadey qoyskiisa. Qofkaa ka shaqeeya arrimaha bulshada, oo lagu tababarey in uu carruurta iyo qoysaska ka caawiyo sidii ay uga gudbi lahaayeen dhibaatadii uu u geystey dagaalka, ayaa caawiyey Cumar iyo qoyskiisa. Lix bilood oo uu dugsi ku jirey ka dib, cabsidii uu ka qabey in la dilo ayaa si tartiib tartiib ah uga yaraatey waxaana waxa uu joojiyey isticmaalkii koollada iyo qaadka. Cumar oo hadda 14 jir ah, waxa uu ka mid yahay kuwa nasiibka wanaagsan. Carruur lagu qiyaasey 200,000 ayaa lala xiriiriyey kooxaha hubeysan ee Soomaaliya ilaa 1991 markii ay dowladdii dhexe burburtey. Qorashadii ay qorteen kooxaha hubeysani waxa ay ku keentey in ay halis u galaan dhaawac iyo naafanimo, geeri, qoyaskooda oo ay ka fogaadaan, waxbarasho la'aan iyo wareer nafsaani ah.



*Ilmo askar laga dhigtey Soomaaliya horraantii 90aadkii.© UNICEF HQ96-1518*

Carruurta oo loo qorto askar waxa ay si toos ah uga soo horjeedda Heshiiskii Xuquuqda Carruurta, Borotokoolkii Gaarka ah ahaa ee Heshiiska Xuquuqda Caruuurta ee ku saabsanaa ka qaybgelinta carruurta ee iskahorimaadyada hubeysan,

Borotokoollada Geneva, iyo sharciyada kale ee caalamiga ah ee xuquuqda bani'aadamka. Waxaa kale oo ay ka soo horjeeddaa Ballanqaadyadii Baariis ee ahaa in carruurta laga ilaaliyo in si sharci darro ah loo shaqaaleysto, oo ay saxiixeen 59 dowladood, oo ay ku jirto Soomaaliya, Baariis 2007.

UNICEF iyo la-hawlgayaasheedu waxa ay la shaqeynayaan hoggaamiyeyaasha beelaha, kuwa diinta iyo dowladda si ay ugu ololeyso ilaalinta carruurta laga ilaaliyo ka qaybgalka iskahorimaadyada hubeysan.

## Xoojinta Beelaha

*Ka yimid bogga 3aad*

**Maxaa ka mid ah culaysyada hawshan idinka haysta?** Mararka qaar dadka ma fahmayaan habka aan u shaqeyno. Ma oga in barnaamij waxbarasho oo muddo dheer ah uu aasaasi u yahay haddii qof ay tahay in uu horumar joogto ah sameeyo. Haseyeeshee, mar haddii ay dadku bilaabaan in ay ka qayb qaataan geeddi-socodka, waxa ay arki karaan qiimaha ay leedahay habka awood-siinta bulshada. Waxa ay arkayaan sida ay isbeddel wanaagsan ugu keeni karto nolosha dadka.

**Maxaa kugu dhiirigelinaya in aad shaqadan sii waddo?** Waan ka helaa la-shaqeynta dadka jecel in ay wax bartaan, koraan oo horumaraan. Marka ugu horreysa ee ay dadku ogaadaan in ay kala doorasho leeyihiin, waxa ay garanayaan xuquuqdooda bani'aadamnimada.

Ereyga Tostan waa Afka looga hadlo Afrikada Galbeed ee Wolof waxana uu macnihiisu yahay "xal". In aan xalkaas ka mid ahaado ayaa ah waxa ugu weyn aan rajeynayo in aan ka helo arrintan.

*Xog dheeri ah oo ku saabsan Tostan, booqo*

www.tostan.org

**200,000 oo carruur ah ayaa lala xiriiriyey kooxaha hubeysan ee Soomaaliya ilaa 1991...**

# U qareemeynta dadaallada looga soo hor-jeedo ciqaabta jirka ee Puntland

*"Carruurta waa in la qaraacaa si ay wax u bartaan."*
*"Ciqaabta jirku waxa ay ka hortagtaa edeb-darrada."*
*"Macallimiintu waxa ay xaq u leeyihiin in ay wax ku dhuftaan carruurta si ay naftooda u difaacaan."*
*"Carruurta edeb-daran waa in la qaraacaa."*
*"Haddii la mamnuuci lahaa ciqaabta jirka, dugsiyada waxa ka jiri lahaa nidaam-darro."*

Kuwan kore waa qaar ka mid ah fikradaha kha-ladka ah ee lagu difaaco ciqaabta jirka. Hasey-eeshee, xaqiiqadu waxa ay tahay in ciqaabta jirka – oo loo qeexo "xannuun ama raaxo-la'aan kas loogu geysto ama/iyo xoog loo adeegsado arday si loo joojiyo ama loo beddelo hab-dhaqankiisa" – waxa ay dhaawacdaa carruurta. Waxa ay badisaa dhibaatooyinka barashada waxaana ay yareysaa awoodda ay carruurtu maskaxdoodu ku dejin karaan waxna ku xusuusan karaan. Xaaladaha ugu ba'ani, ar-dayda jir ahaan loo ciqaabo waxa ka muuqato calaamado jahawareer nafsaani ah waxaana ay ka baqaan aadista dugsiga. Marka ay ardaydu ku arkaan rabsho dugsigooda waxa ay car-ruurta bartaan in ay iyagu laftigoodu ay rab-shoole noqdaan. Dugsiga waa in uu kaalin muhiim ah ka cayaaraa difaacidda xuquuqda carruurta oo ay ka mid tahay in laga ilaaliyo rabshadda.




***Ka-qaybgalayaasha aqoon-is-weydaarsi hore oo ku saabsanaa ilaalinta carruurta oo ay soo qabanqaabiyeen UNICEF iyo NGO-ga la-hawlgala ee KAALO.***

Soomaaliya aad ayaa ay ugu badan tahay ciqaabta jirka waxaana ay dad badan u haystaan hab la aqbali karo oo loo edbiyo carruurta. Ar-dayda waxa ay ka soo cawdeen in ulo iyo fiilooyin lagu qaraacay, ku-waas oo nabaro ku reebey jirkooda, iyo in lagu ciqaabey in ay layli jirdhis saacado badan ku sameeyaan meel qorax leh. Macallimiinta oo qaar badan oo ka mid ahi sidaas oo kale loogu soo edbiyey ciqaab jireed markii ay yaraayeen ayaa ku dooda in ay carruurtu si wanaagsan wax u bartaan marka ay ka baqayaan ciqaab jirkooda soo gaarta.

Heseyeeshee, hab-dhaqankan ayaa ay bilaabatey in uu isbeddelo taas oo ay keentey ololayaal u-qareemeyn iyo wacyigelin. UNICEF waxa ay la shaqeysaa Wasaaradda Waxbarashada ee Puntland iyo ururka de-gaanka ee kala hawlgala dhinaca u qareemeynta, ee la yiraahdo KAALO *Releif and Development*, ee Puntland si wax looga qabto arrinta ciqaabta jirka. Habka UNICEF ay u mareyso ayaa ah in hab-dhaqanka la beddelo iyada oo la adeegsanayo xog-siin iyo munaaqasho, markii-bana la beegsado hal macallin. Macallimiinta ayaa lagu wacyigeliyaa cilmi-nafsiga carruurta, sharciga xuquuqda bani'aadamnimada, iyo xiriirka ka dhexeeya Islaamka iyo ilaalinta carruurta. Waxa ay fahmaan saameynta xun ee ciqaabta jirka ay ku reebto carruurta waxaana ay ogaal weyn u yeeshaan kaalintooda ku aaddan ilaalinta carruurta. Markii dadaalka u qareemeyntu uu bilowday 2006dii, in ka badan 2,500 oo isugu jira macallimiin, ardayda dugsiyada, waalidiin iyo guddi-yada waxbarashada bulshada ayaa lagu beegsadey aqoon-is-weydaarsiyo, munaaqashooyin iyo ololeyaal saxaafadeed. Ololaha ayaa ku guuleystey bed-delidda hab-dhaqanka ku aaddan ciqaabta jirka iyada oo la dhiirige-linayo xuquuqda carruurta ay u leeyihiin in laga ilaaliyo rab-shadda iyo in la taageero habab carruurta lagu edbiyo oo ka du-wan ciqaabta jirka.

Dadaalkan u qareemeynta ah daraaddii, Wasaaradda Waxba-rashada ee Puntland ayaa soo saartey wareegto lagu mamnuu-cayo ciqaabta jirka, waxaana caddeeyey in ka badan 42 dugsi oo ku yaalla Puntland in ay mam-nuuceen ciqaabta jirka. Dugsiyadan ayaa waxaa yaraatey nisbada ar-dayda ka tagta waxbarashada, waxaana kor u kacay is-qorista waxaana ay ardaydu tilmaameen in uu ka jiro jawi waxbarasho oo wanaagsan. "Beddelka Ciqaabta Jirka" ayaa waxaa sameeyey Wasaaradda Waxba-rashada ee Puntland oo kaashaneysa KAALO, si loo hubiyo in macal-limiintu ay haystaan qalab ay carruurta ku siiyaan jawi ammaan ah oo qaabeysan. Intii uu socdey mid ka mid ah casharada, Cali oo ah macallin dugsiga hoose dhiga ayaa yiri 'sanado badan ayaa ciqaabta jirku ii ahayd habka keliya ee aan ku edbin jirey ardaydayda; waxa aan xusuustaa carruur badan oo u goyn jirtey fasalkeyga halka qaar kalena ayba isaga tageen dugsiga ciqaabta jirka daraaddeed. Heseyeeshee, ilaa markii laga mamnuucay dugsigeena, waxa aan dareemayaa in xiriirka carruurta iyo macallimiintu uu soo wanaagsanaadey iyo in car-ruurtu ay xiiso u hayaan waxbarashadooda.'

## *Beddelka ciqaabta jirka: 10 mabda' 'edeb-siin uu la socdo daryeel'

**1. La hadal carruurta** si loo abuuro xiriir is aamin. Arrintan waxaa ka mid ah dhegeysiga. Ha dareemaan in aad dary-eeleyso. Tani waxa ay marar badan wanaajin kartaa hab-dhaqanka.

**2. Samee xeerar cad**. Isku day in aad u sheegto si habboon (tusaale ahaan. Halkii aad ka dhihi lahayd "jug ha siinin albaabka, dheh "albaabka tartiib u xir"). Si habboon oggolaansho ugu xooji carruurta raaca xeerarka.

**3. Dhammaan dareenka waa la abaal-mariyaa.** Isku day in aad hab-dhaqanka habboon ku abaal mariso dareen-siin.

**4. Bixi xoojin oggolaansho ah** adiga oo abaal marinaya hab-dhaqanka wanaag-san (tusaale ahaan, u muusoosho ama amaan).

**5. Bixi xoojin diidmo ah** wixii dhaqan-xumo ah adiga oo muddo kooban ka qaadaya wax la jecel yahay (tusaale ahaan. Adiga oo mar u diida in uu ilmuhu bannaanka ku soo cayaaro).

**6. Bixi cirib-dambeedda** ay keento je-binta xeerarka. Kuwani waa in ay u hab-boon yihiin loolana jeedaa in ay ilmaha baraan mas'uuliyadda ee aanay noqonin kuwo ceebeeya (tusaale ahaa. Haddii uu ilmo qashin ku tuuro fasalka, waa in uu isagu nadiifiyaa).

**7. Dhiirigeli "Baabi'inta" dhaqan-xumada** adiga oo iska indha-tiraya (haddiiba aanu hab-dhaqankaasi qof dhaawacaynin ama uusan keeneynin qash-qashaad).

**8. Ka abuur meel loo baxo** fasalka dhi-naciisa ama xaggiisa dambe. Haddii uu ilmo jebiyo xeerarka (tusaale ahaan haddii uu wax ku dhufto ilmo kale), waa in uu meeshaa u baxaa shan daqiiqo. Marka uu soo noqdo ilmaha, xooji hab-dhaqanka habboon adiga oo sheegaya in uu hadda si wanaagsan u dhaqmayo uuna ixti-raamayo ardayda ay isku fasalka yihiin.

**9. Baro meelaha la isu diro** ee de-gaanka (tusaale ahaan adeegyada la [talinta, daryeelka caafimaadka, iwm). Waa in aad diyaar u ahaataa in aad u dirto carruurta haddii loo baahdo.

**10. Ahow tusaale wannaagsan!**

***Waxa laga soo qaatey** ***'Discipline with Care Alternatives to Corporal Punish-ment Bogga 2aad, A Guide for Princi-pals, Teachers, Learners, Parents and Communities, the Ministry of Educa-tion and Culture, Republic of Namibia.'***

**Wasaaradda Waxbarashada ee Puntland oo mamnuucdey cuqaabta jirka …**

## Ka halidda "safarkii xannuunka lahaa" ee jarjaridda/goynta saxaaxa dumarka

Iyada oo uu adduunku akhrinayo dhibaatooyinka iskahorimaadyada iyo rabshadaha Soomaaliya, haweeney amaan mudan oo uu magaceedu yahay Shamis oo 70 jir noqoneysa sanadka soo socda, ayaa ka shaqeyneysa in ay nabadda ku baahiso iyada oo adeegsanaysa waxbarashada.

Tuuladeeda Arabsiyo, Soomaaliland, Shammis aad ayaa looga yaqaan. Waxa ay xubnaha bulshadeeda ku tilmaamaan haweeney firfircoon, aan isla weyneyn, furfuran oo weligeed u diyaar ah in ay caawiso dadka kale. Waxa ay dhex gashey waxbarashada bulshada iyada oo ummuliso ah.

Waxa ay aragtey xannuunka aan caadiga ahayn ee marka ay dhalayaan ay qabaan haweenka saxaaxooda la jarjarey (la gudey). Waxa ay go'aansatey in ay meel iska taagto arrrinta gudniinka waxaana ay bilowday in ay kor u qaaddo wacyiga dadka ee ku aaddan halista gudniinku leeyahay.

Shamis waxa ay ku tirtirsiisey haweenka in ay xusuustaan “xannuunkii ay nolosha kula kulmeen,” iyada oo ka hadleysa gudniinka iyo xannuunka uu keeno xilliga dhalmada, iyo in ay “gabdhahooda ka ilaaliyaan xannuunkaas”. Iyada oo isticmaaleysa jeebkeeda, waxa ay qabanqaabisey haween waxaana ay maalgelisey waxqabadyo lagu dhiirigelinayo in la iska dhaafo gudniinka carruurta/guurka khasabka ah.

Shamis waxa ay gacmo furan tuulada Arabsiyo ugu soo dhoweysay Barnaamijka Awoodsiinta Bulshada ee UNICEF/ Tostan. Shamis waxa ay aragtey fursad ay ku heleyso cid ay kaashato oo ay ku sii faafiso xogta ku saabsan xuquuqda haweenka iyo carruurta. Waxa loo doortey Xiriiriyaha Guddiga Maareynta Bulshada oo ah guddi laga dhisey tuulo kasta si ay dusha uga eegaan geeddi-socodka awood-siinta bulshada iyo in ay xiriiriyaan waxqabadyada bulshada ee la xiriira xogta lagu barto casharada lagu bixiyo fasallada.

Shamis waxa ay durba muujisey in ay tahay mid ka mid ah hoggaamiyayaasha Guddiga Maareynta Bulshada ee ugu firfircoon uguna taabogalsan Soomaaliland.

Iyada oo ka madax ah guddiga iyo ka dib markii ay wax ka baratey xuquuqda bani'aadamka iyo halista uu leeyahay gudniinka, 40 ka mid ah ka qaybgalayaashii casharadii Arabsiyo ayaa booqdey siddeed beelood oo deris la ahaa si ay isudhaafsadaan ugana munaaqashoodaan wixii ay ka barteen gudniinka.

Shamis waxa ay sidoo kale ka qaybashay kulan ay tuulooyinka ka yeesheen sidii loo dhiirigelin lahaa in beelaha deriska la ah ay isaga dhaafi lahaayeen gudniinka. Waxa ay 25kii Juunyo 2008 iyada oo joogta magaalada Maxamed Mooge ay si fagaare ah uga hadashey mas'uuliyadda ragga ka saaran in ay gacan ka geystaan joojinta gudniinka.

Waxa ay dad badan oo isu yimid u sheegtey in diididda ay diidaan in ay guursadaan haweenka aan la gudin daraaddeed ay raggu kaalin xoog leh ay ku leeyihiin in uu gudniinku ahaado wax ay bulshadu isku raacsan tahay uuna sii jiro.

Waxa ay weydiisatey raggii goobta joogey in ay muujiyaan ixtiraamka ay u hayaan sharafta bani'aadamka iyo xuquuqda haweenka oo ay diidaan gudniinka iyaga oo ah aabbayaashii, raggii qabey iyo walaalahii haweenka. Hadalkeedii waxaa si farxad leh sacab ugu soo dhoweeyey rag iyo haweenba. Tusaale kale oo muujinaya dadaalka kale ee ay Shamis




***Shamis oo la hadleysa ka-qaybgalayaasha shir ka dhan ah gudniinka oo ka dhacay Arabsiyo.© 12-08/Tostan***

Sameysay ayaa laga arki karaa afar haween ah oo ka qaybgeli doona doorashada soo socota iyaga oo u tartamaya kuraasta Golaha Wakiillada. Howeenku horey uma ogeyn in ay xaq u leeyihiin in ay xafiis u tartamaan.

Waxa ay arrintaa mahaddeeda siinayaan casharadii Barnaamijka Awood-siinta Bulshada oo ay ku ogaadeen xaqa ay u leeyihiin in ay codeeyaan iyo in la doorto, waxaana ay sheegeen in haddii aaney u tartamin xafiis, ay markaa dayaceen mas'uuliyaddii ka saarneyd in ay hirgeliyaan wixii ay barteen. “Haddii aanan dhab ahaantii u tartamin xafiis, markaa ma aanan hirgelin wixii aan ka baraney casharadii ku saabsanaa dimuqraadiyadda.” Shamis ayaa ugu horreysey dadkii dhiirigeliyey in ay ku tartamaan ballanqaad ah in ay dhiirigelinayaan wanaajinta caafimaadka iyo waxbashada bulshada reer Arabsiyo.

Shamis waxa ay sidoo kale ku dhiirigelineysaa ka qaybgalayaasha ka da' yar in ay ahaadaan kuwo tallaabo hore u qaada oo ay dadka kale gaarsiiyaan wixii ay barteen. Nin dhalinyaro ah ayaa sheegey in ka hor Barnaamijka Awood-siinta Bulshada, waxba uusan ka garaneynin dimuqraadiyadda iyo xuquuqda aadanaha, laakiin hadda waxa uu aaminsan yahay in wacyigelinta xuquuqda aadanaha ay joojin karto rabshadda ayna ka qaybqaadan karto nabadda. Sidaa daraaddeed waxaa u qorsheysan in isaga oo kaashanaya Shamis uu ardayda kale ee dugsiga sare u bilaabo casharada Awood-siinta Bulshada.

Dhiirigelinta Shamis waa mid faafaysa. Iyada oo taageero ka heshey Tostan, UNICEF, iyo Dowladda Soomaaliland, waxa ay ku guuleysatey in ay abaabusho boqolaal qof oo ka qaybqaata ololaha wacyigelinta ee ku aaddan xuquuqda bani'aadamka, laakiin waxa ay og tahay in weli ay hawlo badan harsan yihiin. Waxa ay ku taameyso ayaa ah in sanadaha soo socda ay hoos u dhigto nisbada akhir/qoris la'aanta bulshadeeda, sii waddo ku dhiirigelinta haweenka in ay si firfircoon uga qayb qaataan go'aan gaarista, wanaajiso caafimaadka haweenka iyo carruurta oo ay dhiirigeliso horumar waara. Geesinimadeeda iyo firfircoonideeda xad-dhaafka ah daraaddeed, Shamis waxaa higsanaya gabdhaha iyo haweenka dunida ku nool ee doonaya in ay isbeddel keenaan.

**Shamis ayaa abaabushey boqollaal qof si ay kor ugu qaaddo wacyiga dadka ee xuquuqda bani'aadamka…**

## Carruurta oo lagala hadlo miinooyinka dhulka ayaa badbaadineysa nafo

Laba carruur ah, Ciise iyo Faadumo, ayaa ka soo cararey dagaallo ka dhacay magaaladooda, Muqdisho. Waxa iyaga oo la socda qoysaskooda ay soo degeen xerada Raage ee dadka gudaha ku barokacay, ee ku taalla waddada Afgooye, ee ka baxsan Muqdisho. Waxa ay ku biireen 400,000 oo ah dad iyagana af soo barakiciyeen iskahorimaadyada hubeysan ee Muqdisho, kuwaas oo ay noloshoodu ku xirneyd gargaarka bani'aadamnimada.

Carruurtan waxa ay labadooduba xusuusan yihiin maalintii ay Muqdisho ku cayaarayeen ee ay si kam ah u qarxiyeen miinada dhulka. Ciise gacan ayaa uu si xun uga dhaawacmay. Faadumana il ayaa ay ku beeshey.

Miinooyinka iyo Hubka aan Weli Qarxin waxa ay hubka kale ee dagaalka uga duwan yihiin iyaga oo weli leh awood ay u leeyihiin in si aan loo meel dayin ay wax u dhaawacaan waxna u dilaan, waxaana ay ka cumri dheer yihiin iskahorimaadyadii iyaga lagu isticmaaley. Waxaa ay weli halis ku sii yihiin rayidka jiilalka soo socda, gaar ahaan carruurta. Miinooyinka dhulka waxa ay ku aasnaadaan beeraha, waddooyinka, dugsiyada gadaashooda iyo lamadegaanka ilaa uu qof si kam ah uu u qarxiyo, ama uu ilmo yar helo hoobiye oo uu markaana ku ciyaaro.

Faa'isa waxa ay ka mid tahay qareennada UNICEF taageerto ee ilaaliya carruurta kuwaas oo booqda bulshada, kuna wacyigeliya xuquuqda carruurta oo ka caawiya in ay helaan tabo ay carruurtoodu ku helaan ammaan. Aad bey u feejigan tahay, inta ay ku jirto shaqada, oo waxa ay bulshada ka dhegeystaa in ay iyagu helaan arrimaha ay dareemayaan in ay muhiim u yihiin. Intii ay ka shaqeyneysey waddada Afgooye, waxa ay la kulantey Ciise iyo Faadumo iyo sidoo kale xubno kale oo ka mid ah dadkii soo barokacay. Iyaga oo qiraya in ay weyn tahay dhibaatada miinooyinka iyo hubka aan weli qarxin ee degaanka yaalla, bulshadii soo barokacdey waxa ay go'aansadeen in ay arrintan u baahan tahay in wax laga qabto.

Faa'isa oo lagu tababarey ilaalinta carruurta waxa ay isu keentey carruurta iyo qaan-gaarka bulshada si ay wax uga dhaadhiciso. Waxa ay adeegsatey sawir iyo agab kale oo ay bixisey hay'add UNDP Mine Action oo muujinayey calaamadaha lagu garto miinooyinka iyo hubka aan weli qarxin. Waxa ay u sharaxday waxa ay tahay in ay sameeyaan marka ay arkaan waxyaabo ay ka shakiyaan iyo sida la isaga ilaaliyo qarxinta hub dhibaato badan geysan kara. Iyada oo ka duuleysa sida ay carruurtu ugu nugul yihiin dhibaatada miinooyinka iyo hubka aan weli qarxin, carruurta oo inta badan jecel in ay ku ciyaaraan biraha dhaldhalaala, waxa ay dadaal gaar ah ku bixisey sidii ay carruurta u siin lahayd xog ay nafahooda ku badbaadiyaan iyada oo kooxo munaaqasho sameeyo ka abaabushey dugsiyada ku meel gaar ah ee carruurta soo barokacday wax ku bartaan.

Miinooyinka dhulka iyo hubka aan weli qarxin waxa ay ku tuntaan ku dhowaad dhammaan qodobada Heshiiska Xuquuqda Carruurta: xaqa uu ilmuhu u leeyahay in uu noolaado, degaan ammaan ah oo uu ku ciyaaro, caafimaad, biyo nadiif ah, fayadhowr iyo waxbarasho ku filan. Iyaga oo arrimahaan isu abaabuley, bulshooyinka ku nool waddada Afgooye waxa ay door muhiim ah ka ciyaareen ilaalinta iyo kor u qaadista xuquuqda carruurta.

Markii ay Faa'isa ka tagtey bulshadaan, qoysaskii soo barokacay waxa ay halkii ka sii wadeen in ay ka munaaqashoodaan wixii ay barteen. Runtii, cunsurka ugu muhiimsan isgaarsiinta ku jiheysan dabeecad beddeliddu waa tan ka dhex dhacda bulshada dhexdeeda. Sidaa daraaddeed, maalmihii ka dambeeyey waxa ay sii wadeen in ay ka munaaqashoodaan miinooyinka dhulka iyo hubka aan weli qarxin – marka ay diyaarinayaan cuntada, dhaqayaan dharka ama ay u socdaan dugsiga. Munaaqashooyinkani ayaa si weyn uga qayb qaadan doona ka ilaalinta carruurta bulshooyinka soo barokacay silica haysta Ciise iyo Faadumo.

**Qeexid**

**Miinada Dhulka** waa qalab Qarxa oo loo qaabeeyey in la dul dhigo ama lagu aaso dhulka si uu u qarxo marka uu qarxiyo qofka haga ama ay ku joogsado baabuur, qof, ama xayawaan.

**Hubka aan weli qarxin** waa hub qarxa oo aan weli qarxin markii la adeegsadey oo weli halis ugu jira in uu qarxo, xataa tobanaan sano ka dib markii la isticmaaley ama la tuurey.



*Hub aan wlei qarxin oo laga heley Gedo, Soomaaliya (bidix) iyo miinooyin badan iyo hub aan weli qarxin oo yaalla Hiiraan, Soomaaliya© UNDP /SRSA*

**Magacyada carruurta ku qoran warsidahan waa la beddeley si loo ilaaliyo ammaankooda**

**Wixii xog dheeri ah oo ku saabsan barnaamijkeena ama sida aad noo taageeri karto, fadlan nagala soo xiriir:**


| | | |
|---|---|---|
| Christian Balslev-Olesen, Representative | cbalslev@unicef.org | + 254 722 514 569 |
| Denise Shepherd-Johnson, Chief of Communication | dshepherdjohnson@unicef.org | + 254 722 719 867 |
| Robert Kihara, Communication Officer | rkihara@unicef.org | + 254 722 206 883 |
| Paul Fiszman, Child Protection Specialist | pfiszman@unicef.org | +254 714 397 482 |


**Nagu soo booqo www.unicef.org/somalia**